



Qaadashada kaniiniyada aayodhiin

(Kaniinada Bootaashiyamka aayodhiin G.L. Pharma 65 mg)

Haddii ay dhacdo shil shucaac, kiniinnada aayodhiin ayaa loo isticmaalaa si looga hortago aayodhiinka kaah-faleed (aaysotoobka kaah-faleed ee aayodhiin) ee ku baaho hawada inay ku ururto qanjidhada dhuunta ka dib marka la liqo ama la neefsado. Isticmaalka kaniiniyada aayodhiin haddii ay dhacdo khatarta kaah-faleedka (shucaaca) waxay yaraynaysaa halista kansarka luqunta (tayroodhka).

Qaado oo keliya aayodhiin marka ay masuuliyiintu soo saaraan ogeysiis ku saabsan qaadashada daawada. Oggolaanshaha qaadashada daawada waxaa lagu shaacin doonaa raadiyaha ama telefishinka ama isgaarsiin kale oo rasmi ah.

Daawooyinka waa inaan loo qaadan ka hortag ahaan

Baakadu waxay ka kooban tahay 10 kiniin ah. Ha ka badsan qiyaasta. Kaliya qaado hal qiyaas. Maamulka ayaa laga yaabaa inay kugula taliyaan inaad qaadata qiyaas labaad goor dambe. Si kastaba, qiyaas labaad laguma talinayo dhallaanka dhawaan dhashay, haweenka uurka leh ama hooyooyinka naas-nuujinaya.

Qiyaasta kiniinnada aayodhiin ee kooxaha da'aha kala duwan iyo haweenka uurka leh

(kaliya khuseeyo kiniinka 65 mg)

Da'da	Qiyaasta	Tirada kiniinada 65 mg	Sawir
dhallaanka da'doodu ka yar tahay 1 bil	16.25 mg	$\frac{1}{4}$ kiniin ah	
1 month–2 years	32.5 mg	$\frac{1}{2}$ kiniin ah	
carruurta da'doodu u dhaxayso 3-11	65 mg	1 kiniin ah	
dadka da'doodu u dhaxayso 12-40 iyo haweenka uurka leh	130 mg	2 kiniin	

Dadka da'doodu ka weyn tahay 40 sano aayodhiin faa'iido uma leh (marka laga reebo haweenka uurka leh).

Kiniinka aayodhiin waa la jajabin karaa ama la ruugi karaa. Si ay kuugu fududaato liqidda daawada, waxaad ku burburin kartaa kiniinka aayodhiin qaaddo, tusaale ahaan, oo waxaad ku qasi kartaa inyar oo ah biyo, caano ama casiir. Waxay qaadan kartaa dhowr daqiiqo in daawadu ay milanto.

Ha qaadan kaniiniga aayodhiin haddii:

- aag tayroodhka lagaa saaray ama uusan shaqaynayn (aayodhiin faa'iido ma leh markaa)
- aad hore ugu lahaan jirtay dareen-celin xasaasiyadeed oo halis ah aayodhiinka
- aad la ildaran tahay hyperthyroidism (kacsanaanta qanjirka tayroodhka), dermatitis herpetiformis (xasaasiyadda guluteenka) ama vasculitis (xidido barar) oo ay la socoto bararka xididada dhiiq-qaadayaasha yar-yar iyo borotiin yarida dhiigga (hypocomplementemic vasculitis).

Dhig kiniinka meel aanay carruurta gaari karin. Haddii ilmahaagu ku nool yahay laba guri, dhig kiniinka labada guriba.